



# Nala Shaqee!

Barnaamijka Beddelaada Buundada Interstate-ka (IBR) wuxuu dhisayaa isku xir qaabab kala duwan leh oo loogu talagalay dhammaan dadka safarka ah ee ka gudbaya Columbia River, iyada oo sidoo kale la dhisayo bulsho awood leh iyada oo la taageerayo fursada dhaqaale. Bixinta maalgelinta uu oo jeediyay barnaamijka IBR waxay u baahnaan doontaa kumanaan shaqaale ah oo xirfad leh oo dhanka ganacsiga ah laga soo bilaabo shubka iyo birta ilaa laga gaarayo maamulka mashruuca iyo xaqiijinta tayada. Shaqaale xirfad leh oo diyaar u ah in ay buuxiyaan caqabadaha mustaqbalka wuxuu muhiim u yahay guusha barnaamijka.

## Maxaa la dhisi doonaa?

Barnaamijka IBR wuxuu buundada Interstate-ka ee duuga ah ee guud ahaan Columbia River ku beddeli doonaa qaab-dhismeed dhulka gariirka u adkeysta oo bixiya kala doorasho ammaan ah oo la gali karo oo loogu talagalay wadista gaariga, socodka, baaskiilka/bushkuleetiga ama wadashada shay taayiro leh 'rolling', iyo raacitaanka gaadiidka. Maalgelinta barnaamijka IBR ee la soo jeediyay waxaa ka mid ah:

- ▶ Buundo cusub oo galbeedka ka xigta qaab-dhismeedka hadda jira.
- ▶ Hagaajinta toddobo ah jidadka isweydaaranaya 'interchanges' oo waqooyiga iyo koonfurta ka xiga Columbia River.
- ▶ Ballaarinta tareenka fudud laga soo bilaabo Expo Center oo ku taala Portland ilaa laga gaarayo Evergreen Boulevard oo ku taala in Vancouver.
- ▶ Wax hagaajin loogu talagalay dadka lugeeya, baaskiilka/ bushkuleetiga ama wata shay taayiro leh 'rolling'
- ▶ Ku darida baska degdega ah ee aan qiiqa lahayn 'zero-emissions' ee jidka geeskiisa ee buundada.
- ▶ Saddex haad oo la maro iyo ku darida ugu yaraan hal layn oo dheeraad ah.
- ▶ Heerka lacag bixinta 'tolling' oo kala duwan oo loogu talagalay darawaliinta isticmaalaya isgoysyada webiga si ay gacan uga geystaan maalgelinta hagaajinta iyo maareynta gaadiidka.

## Baahiyaha Shaqaalaha iyo Taageerida Kala duwanaanshaha iyo Ka mid noqoshada

Warshadaha ganacsiga iyo dhismuhu waxay sameynayaan dadaal lagu dhiirigelinayo shaqaaleysiinta haween badan, dadka midabyada kala duwan leh iyo soo halgamayaasha ee ee shaqaalaha oo dhan. Barnaamijyadani waa kuwo waafaqsan hadafka heer gobol iyo heer qaran si loo shaqaaleysiyo shaqaale badan oo kala duwan oo loo taageero dhaqanka sinnaanta iyo ka mid noqoshada. **Barnaamijka IBR wuxuu ka dadaalayaa in uu dejiyo tusaale muujinaya sida mashaariicda kaabayaasha waaweyn u dejin karaan oo buuxin karaan hadafka ah isticmaalka shaqaale kala duwan si loo bixiyo maalgelinta gaadiidka.** Si hab wanaagsan loogu fahmo suuqa shaqada dhismaha ee ku yaala meelaha magaalada ah ee Portland-Vancouver, barnaamijka IBR wuxuu xilsaaray daraasad lagu ogaanayo fursadaha iyo farqiga ka jira dhanka shaqaalaha gobolka ee dhowrka sano ee soo socda.

Daraasada dhanka shaqaalaha waxaa lagu ogaaday in shaqaalaha gobolku ay muujiyeen koritaan xooggan dhowrkii sano ee la soo dhaafay, balse aysan jirin shaqaale ku filan oo haween ah iyo dadka midabyada kala duwan leh si loo daboolo baahida sii kordhaysa ee loo qabo shaqaale badan oo kala duwan. **Daraasadan waxaa lagu ogaaday in ka badan 100 ah mashaariicda waaweyn ee dadweynaha kuwaasi oo u baahan doona qiyaastii 22,000 oo ah shaqaalaha dhismaha, oo qiyaastii leh hadafka kala duwanaanshaha oo muujinaya baahi shan sano ah oo loo qabo 3,800 oo ah dadka baranaya ganacsiga/xirfadaha 'apprentices', dadka midabyada kala duwan leh, iyo 2,500 oo ah dumarka ka shaqeeya dhismaha.** Daraasadu waa tallaabada u horreysa oo muhiim u ah dadaalada barnaamijka ee in uu noqdo mid si ku talagal ah uga turjumaya sida loo raaco tallaabooyinka saameynta leh si kor loogu qaado kala duwanaanshaha iyo ka mid noqoshada shaqaalaha gobolka.

# Fursadaha Shaqo ee Mustaqbalka

Dhismaha barnaamijka IBR wuxuu fursado u abuuru doonaa shaqooyin kala duwan in ka badan toban sano oo shaqo ah, laga soo bilaabo shaqaalaha heerkoodu hooseeyo ilaa laga gaarayo doorarka maamulka goobta shaqo.

Waxaa jiri doona baahi loo qabo shaqaalaha xirfada leh iyo heerkoodu hooseeyo ee qaybaha kala duwan, oo ay ku jiraan balse aanan ku koobnayn:

- ▶ La socodka hawada, buuqa, iyo tayada biyaha
- ▶ Naqshadeynta dhismaha
- ▶ Saarida laamiga
- ▶ Karaanimada
- ▶ Shubka
- ▶ Maamulka dhismaha
- ▶ Qiyaasida kharashka
- ▶ Saarida qashinka/haraaga
- ▶ Wax duminta
- ▶ Naqshada
- ▶ Godadka la qodo
- ▶ Korontada
- ▶ Wax qodista
- ▶ Taageerada xarumaha
- ▶ Dhaqaalaha
- ▶ Biraha wax ilaaliya
- ▶ Qiyaasaha kharashka oo madax banaan
- ▶ Shaybaarka iyo tijaabinta qalabka goobta
- ▶ Qurxinta dhulka
- ▶ Rinjiyeynta
- ▶ Iskuduwida oggolaanshaha
- ▶ Maamulka mashruuca
- ▶ Wacyigelinta bulshada
- ▶ Dayactirka buundada hoosteeda
- ▶ Waddooyinka/laami saarida
- ▶ Jadwal dejinta
- ▶ Ammaanka
- ▶ Dhismaha isticmaalka dariiq la wadaago
- ▶ Calaamadaha
- ▶ Dhawaqa iyo derbiyada wax haya
- ▶ Sameynta birta/taagista
- ▶ Maareynta biyaha roobka
- ▶ Wax sahaminta
- ▶ La socodka dhismaha ee dhinac saddexaad
- ▶ Xakameynta gaadiidka
- ▶ Xarumaha gaadiidka
- ▶ Gawaarida Xamuulka ah
- ▶ Raritaanka utility-ga
- ▶ Yareynta dhulka qoyan

## Ilaha Degaanka ee Shaqo Raadiyayaasha:

### Kooxaha Bulshada

- ▶ Worksystems, Inc. (Degaannada Multnomah & Washington)
- ▶ Workforce Southwest Washington (Degaannada Clark, Cowlitz & Wahkiakum)
- ▶ Clackamas Workforce Partnership (Degaanka Clackamas)
- ▶ Prosper Portland (Degaanka Multnomah)
- ▶ Partners In Careers (Degaanka Clark)
- ▶ Innovative Services NW (Degaanka Clark)
- ▶ Portland Workforce Alliance (Meelaha magaalada ah)

### Hay'adaha Dowladda

- ▶ Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha ee Oregon
- ▶ Barnaamijka WSDOT PASS
- ▶ Barnaamijka Shaqada ee ODOT
- ▶ Waaxda Shaqaalaha & Warshadaha ee Washington



Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan tababarka shaqo iyo xirfadaha ganacsi, booqo website-kayaga:

[interstatebridge.org/DBEpartners](http://interstatebridge.org/DBEpartners)

## Nagu xirnow si aad wax uga ogaato ilaha:



Booqo: [interstatebridge.org/DBEpartners](http://interstatebridge.org/DBEpartners)

Email-ka:

[workforce@interstatebridge.org](mailto:workforce@interstatebridge.org)

## Na soo booqo saacadaha shaqada ee IBR:



Booqo: SignUpGenius

Email-ka: [info@interstatebridge.org](mailto:info@interstatebridge.org)

Wac: 888-503-6735

Fadlan samee 30-daqiiqo oo wax lagu sii hayo 'reservation' ugu yaraan 24 saacadood ka hor.

NAGALA SOCO



### OREGON

Wixii la xiriira ADA (Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka) ama Xuquuqda Madaniga ah Title V qorshayaasha, adeegyada turjumaad/fasiraadda, ama macluumaad dheeraad ah wax 503-731-4128, TTY 800-735-2900 ama Adeegyada Gudbinta Wararka ee Oregon 7-1-1.

### WASHINGTON

Codsiyada wax sii qorsheynta ee loogu talagalay dadka naafada ah ee ku nool Washington ayaa la sameyn karaa iyada oo lala xiriirayo kooxda WSDOT Diversity/ADA Affairs oo laga helo [wsdotada@wsdot.wa.gov](mailto:wsdotada@wsdot.wa.gov) ama iyada oo la wacayo khadka bilaashka ah, 855-362-4ADA (4232). Dadka aan dhagaha wax ka maqal ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi iyaga oo soo wacaya Adeegyada Gudbinta Wararka ee Gobolka Washington ee 711. Qof kasta oo aaminsan in ilaalintiisii/ilaalinteedii Title VI lagu xadgudbay, waxay cabasho u gudbin karaan Xafiiska Sinnaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah (OECR) ee WSDOT. Isku duwaha Title VI iyada oo lala xiriiryo 360) 705-7090.